# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:07 AM** **Hansard No.19/7** **Kal-fadhi 19aad fadhiigsa 21aad**

**13/10/2012**

**Dooda Xeerka Sirdoonka Qaranka oo socotay 1 maalin waxaana ka qayb qaatey 06 mudane.**

***Gudoomiyaha: -*** Fadhigu wuu inoo furan yahay, sidaad la socoteen Xeerkii Asaaska Komishanka Maamul Wanaag iyo La-dagaalanka Qaranka waxaynu u saarney Adcock Committee ka koobnaa 5 mudane oo kala ahaa

1. Md. Xuseen Maxamed Cige
2. Md. Abuubakar C/raxman Good
3. Md. Xasan Cawaale Caynaan
4. Md. C/raxman Yusuuf Cartan
5. Md. Cali Xasan Maxamed.

Gudidda ku meelgaadhka ah ee xeerka loo saaray markey soo akhridey hadal qoraalkii Dooda Xeerka markay deristey Xeerka iyo soo jeedimaha Mudanayaasha waxay soo Go'aamisey in Xeerkii Xukuumadu soo gudbisey sidiisa lagu ansixiyo, waxaana mudanayaasha loo qeybinayaa Xeerka Maamul wanaaga ee Xukuumadu soo gudbisey, barina waa loo codeyn doonaa.

Hawlmaalmeelka 2aad ee maanta waxaa hore la idiinku qeybiyay Xeerkii Sirdoonka Qaranka waxaana bilaabmeysa Doodiisii sidaan u balansanayn, sidaa darteed mudanayaasha dooda ka qeybqaadanayaa ha is qoraan, xoghayntuna ha soo liis gareeyaan.

***Dooda Xeerka Sirdoonka Qaranka***

1. **Md. Cali Xasan Maxamed ( Cali-Mareexan):-** xeerkan anigu markaan akhriyay waa xeer kooban, runtii kumaana arag wax dastuurka ka horimanaya iyo shuruucda dalka ka horimanaya, ujeedada loo asaasey baan akhriyay, ujeedada loo asaaseyna wuxuu xeerku ku soo koobey, hay'ada NIA ujeedada loo asaasey waxa ay u xilsaaran tahay inay xogta amniga iyo faqaraha dalka ee gudaha iyo dibada soo ururiso, hay'ad

talaabo qaadeysa maaha, hay'ad law inforced ah ama ciidan ah maaha sida xeerku dhigayo, laakiin waa hay'ad xog doon, waana loo baahan yahay in dalku xog helo, xogtuna gudaha iyo dibadaba wey ka imanaysaa, waxayna u xilsaaran tahay inay nabadgalyada dalka wixii wax yeelaya ka qabato.

Runtii anigu wax contradiction ah oo iska horimanaya kumaan arag ama iska horimanaya, madaama ay tahay hay'ad dhowr iyo toban sano dalka ka jirtey, oo dhisan oo shaqeynaysa, oo nabadgalyada dalka qeyb ka qaadanaya ay tahay, iminkana waxaynu u baahanahay oo tahay in la sharcigareeyo, madaama international community la dhiilgareynayso waxaa markaba la isweydiinayaa xeerkii lagu aasaasey, dhinaca dalkeenana waxaa loo bahanyahay in tahay hay'ad sharciya, waxaan markaa halkan aad iyo aad uga mahad celinayaa Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca oo soo koobtey talooyina inoo soo jeedisey.

***Waxaan Markaa Taageersanahay:-***

- Soo jeedinta Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabaglayda iyo Difaaca in Xeerkan loo ansixiyo sida ay ku soo gudbisey, waad mahadsantihiin.

2. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable):-** Shirgudoonka iyo Mudanayaashuba waad salaaman tihiin, hay'adani waa hay'ad indhihii wadaka ah, dawladnimadu kama liidato reer meel degan inta meel loo soo sahminayo, dawlada aan intelligence lahayn gudaheeda iyo agagaarkeed toona waxba ka ogaanmeyso, madaxweyne meel ma tago ilaa nimanka intelligence meesha tago oo nabadeeda, sharcigeed, hanaanka iyo dhaqaalaha wadanka soo ogaadaan, hadhaw si khudbadiisa uu ugu darsado oo salgareynayo informationkaa sirdoonku so helay, xaalada dibada tan gudaha ka waraagsan, taasi waa arraartii hore.

   Intelligence saadaal iyo cilmi ururin buu sameeyaa maaha tan meelahan hudheelada iyo suuqa soo dhageysata, waa niman cilmi ku shaqeeya oo sameeya saadaal ku saleysan dhaqaalaha iyo dhamaan qeybaha kala duwan information ka haya, sharciga marka la sameynayo waxaa muhiima in cida sameynaysaa dastuurka dib ugu noqoto, xuquuqda iyo xoriyaadka bani'aadamka u dhaxeysa dastuurka xadeeyay, markaa

weydadaaleen wixii badnaa ee dadka lagu xukumi jirey waa laga soo saarey.

Gudoomiye, **Qodobka 128aad** ee dastuurka wixii qodobkaa ka horyimaadaa waa waxba kama jiraan, **F/25aad** cid xoriyada asaasiga ah lagama qaadi karo, hadii laga qaadayo waa Qodobkaa dastuurka ee xuquuqda iyo xoriyada muwaadinka xadidey dib loogu noqdaa oo siduu sheegayo loogu dhaqmaa, oo aan wax la iska soo qortey lagu aan qaadin, markay opperatoin fulinayaan wixii alaabana halkaas ayay kula wareegi karaan buu leeyahay, dee dastuurku taa ma sheegin, waa emergency law, qaanuunkan iminka loo sameynayo waa Xeerka ciqaabta guud waafaqsanaadaa.

Tan kale, ***Hay'adu waa inay astaan yeelataa***, waxaan astaan lahayn oo plate number uu gaadhigoodu yeeshaa waa fake, markaa waa muhiim inay astaan yeeshaan oo halkan lagu soo daraa, cadibaada iyo in ajaanib loo dhiibo kuma taalo, waa lagu daraa qofka inaanay cadibi Karin oo aanay cidiyaha ka saari Karin, xiniinyaha la marooji Karin, sidoo kale hay'adu waa Loyer sharciya yeelataa halkan kuma taalo, waa inay nin sharciyaqaan yeelataa hadhaw marka dawlado lala macaamilayaa wixii dastuurka ka soo horjeeda ee loola yimaado la taliyahaa odhanaya waxaad noola timaadeen sharcigayagu ma ogol, taasina waa muhiim.

***Waxaa ku qoran dastuurka ku taal in 24 saacadoo wax ka badan inaan lahayn Karin***, dadka la qabtona intey doonaan baa la haystaa oo gobmadaw baa lagu ritaa, waa in taana sharciga loo raacaa oo ay maxkamada iyo xeer-ilaalinta u soo maraan oo qofka inta la ogolyahay la hayaa, waa inaan ajaanib loo dhiibin qof inta la iska qabto sida dhacda, waa in halkan lagu hayaa haduu danbi geysto ee maaha in ajaanib loo dhiibo.

***Scientific Research*** qayb ah waa inay yeeshaan, waa inay yeeshaan Research dhaqaale Maaliyadeed, Tijaaradeed, Sanaacadeed waa inay yeeshaan search iyo analys political global oo caalami ah iyo mid daakhiliya iyo dowladaha jaarkeena ah ee saaxiibtinimadu ama cilaaqaadku inaga dhexeeyo sidii ay ula macaamili lahaayeen.

Waa inay yeeshaan (***internal regulation)*** ***xeer hoosaadka*** siduu uqabto howlaha oo loo ogaado oo sharcigoodu uu noqdo sharci deciplinekii xeer hoosaadkiiya oo ninwalba qabanaaya waa inay lahaadaan qaybta lifeka ee caalamiga ah si ay dowladaha u fahmaan si

ay turjumaad ugu sameeyaan waa inay yeeshaan qayb qawaaniinta duwaliga ah iyo wadaniga ah iyo lowyaro kutakhasusay howlahaa oo lataliyayaal sharci ah oo qawaaniinta duwaliga ah wadaniga ah intaba yaqaana ilayn hadhow dowladaa lala hadlayaaye inay qaataan oo ay tababaraan dhalinta jaamiciyiinta ah ee soo baxay waa qoraal shaqadoodu had iyo jeer iyaga waa cilmi markaa intay mid suuqa kaqaadan lahaayeen waa inay yeeshaan qayb lasocota horumarka intellegenceka ah ee cusub.

waa inay marka u horaysa tixgeliyaan shaqadooda iyo qawaaniintooda kufadhiisiyaan xoriyaadka caalamiga ah ee dastuuriga ah ee muwaadinku leeyahay iyo kuwa wadanku leeyahay oo xuquuqda, karaamada iyo marka qofka labaadhayo , cadibaadiisa iyo xoog warkaga keenka intaasoo dhan qawaaniinta iyo sharciga wadanka uyaalaa waxa weeye **Qodobka 22aad, 23aad, 24aad, 25aad, 26aad, 27aad 28aad, 33aad, 34aad**, iyo **Qodobka 128aad** oo wax alaale iyo wixii dastoorka ka horyimaadaa inaanay sharci ahayn sheegaya intaa waxaaan kalool kudarayaa inay laybareeri yeeshaan oo ay ka bartaan wixii taariikh ah

3. **Md. Siciid Cartan:-** sida mudanihii iga horeeyay sheegay xeerkani waa xeer aad u muhiima oo aynu waxyaabo badan ugu baahanahay, hadaan is dultaago oo aan inyar gudagalo xeerka, Halka Agaasimaha, waxaan anigu ku badali lahaa Madaxa Hay'ada Dirdoonka Qaranka, ereygan Agaasime waxaa inaga inoogu horeysay markii af-somaliga la qorey, ayaa Direct General loo badaley Agaasime Guud, laakiin erey mucayana oo afsomali ahi majiro, markaa waxaan qabaa ereygaa in la yidhaahdo madaxa sirdoonka Qaranka.

   Markaan intaa hore uga maro, waxaan kaloo isdultaagayaa Qodobada 5aad, 6aad iyo 7aad waxa weeye Gudiddan Arrimaha Gudaha runtii way isxilqaameen oo waxay inoo soo gudbiyeen qoraal fiican, xeerkani waa xeer aan aad u farabadneyn confusion badana lahayn oo daahira, sidaa markey tahay waxaan qabaa **Qodobada 5aad, 6aad** iyo **7aad** oo aad moodo qoladani inay aad u dhex gashay waxaa jira hal paragraph oo kaaga filan oo ku tusaya ujeedada aad leedahay kuuna bayaaminaya kana taya roon ereyo farabadan oo la isbarbardhigo oo la adeegsado macnayaal farabadana leh, qaarna English yihiin confusion bay sameynayaan, markaa **Qodobada 5aad, 6aad** iyo **7aad** waxaa fiican inaynu sida xeerka ugu qoran yihiin aynu u qaadano.

Tusaale ahaan Qodobka 6aad waxaa inoogu qoran, *"Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ka hawlgasho dhulka,badda iyo Cirka Jamhuuriyadda Somaliland ee ku gudo-jira xuduudihiisa caalamiga ah"* xuduudaha caalamiga ah marka la leeyahay waxay soo koobeysaa badii ilaa barigii iyo dhul sheegaya, markay caynkaa tahay, waxaan uga baahanahay markeynu xuduudo caalamiya sheegayno wax tafaasiil ah oo aynu uga baahan nahay majirto, sidaa darteed Qodobadaa inaynu sideeda u qaadano ayaan qabaa.

Hadaan ku daro xilka iyo waajibaadka hay'ada ee Qodobka 7aad, isna waxaan qabaa sidaas si le'eg, waxa uun baa ku darayaa, Xarafka e) Dabalka iyo Qiimeynta, oo waxaan raaciyay kalmada qiimeynta, waayo monitoring and evaluation marna makala hadhaan, oo wixii markii la dabagalo waa in qiimeynteedana la helaa, inta kale waxaan qabaa inay qoran tahay si nidaamsan oo inagaga filan baahideynu u qabney.

**Qodobka 8aad** oo qoladini waxbadan ka soo qortey, wuxuun baan ka qaadanayaa anigu F/2aad ee Xeerka oo u qoran, *Xubnaha Hay'addu waxay qaadan karaan hub fudud, si waafqsan Xeerka Hubka Fudud,* tan kale ay leeyihiin waa inay awood isticmaalaan ee F/3aad, anigu waxaan qabaa hay'adi waa haayad aad u dhisan maaha, waa hay'ad u baahan in aqoonteeda la kordhiyo, dee malaha awood sida MCCda ingriiska ama FBI oo kale malaha awoodeedii, waxay qabanayaan waa information, markaa waa inay la socodsiiyaan kolba cidii ku shaqo leh informationka ay helaan, madaama aanay awood balaadhan lahayn, taana inaan intaa ka qaadano ayaan jeclaa.

**Qodobka 9aad** Qaab dhismeedka ka hadlaya, hay'adu waxay yeelanaysaa waaxyo, waxaan qabaa structureka inaynu ku qiimeyno kolba baahida kolba jira, taana waxaan qabaa in xeerka lagu soo saarayo, **Qodobka 10aad** qofka loo magacaabayo madax hay'ada sirdoonka ama agaasimeba kuu noqdo, had iyo jeer markeynu sheegayno caretriada waxaynu shuruucda ku ansixino, inuu leeyahay aqoon jaamacadeed, dee jaamacaduhu way kala duwan yihiin oo takhasusbay kala leeyihiin, sida gudiddu tidhi waa inuu aqoon u leeyahay sharciga, maaha inuu aqoon uun leeyahay, waxa weeye shaqada loo igmanayo waa inuu aqoonteeda leeyahay, sidoo kale aqoon u leeyahay cilmi nafsiga qof hawshan loo training gareynayo hawlahan mukhaabaraadka.

Intaas uun baa ku soo koobayaa, Markaa anigu inta kale waxaan ku qaatey sideeda.

4. **Md. Maxamed Jaamac Cali:-** Marka hore shirgudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti sharafta kale waan idin salaamayaa, ugu horeyn waxaan xeerka magiciisa laba magac baan wataa, halka ugu horeysa ee nationalka ah, Somaliland intelligence agency ayaan ka dhigayaa oo ku badalayaa si ay u noqoto SIA, Qodobka 4aad halka hay'adu madaxweynaha ayay hoostageysaa waxaan ka dhigay Hay'adu Madaxtooyadey hoosteygsaa, waayo personal maaha waa habmaamul, **Qodobka 6aad** Xuduudaha Caalamiga ah marka la leeyahay, waxa la sheegay dhamaan xuduudaha Somaliland, halkaa xildhibaankii iga horeeyay baan ku raacsanahay, intaa danbe looma baahna iyo tafaasiishaa.

   **Qodobka 7aad** xilka iyo waajibaadka hay'ada, Xarafka **a)** halka kalmada hufida, waxaan ka dhigayaa hubinta, waxbaa la hubinayaa ee la hufimaayo ayaan leeyahay, anigu intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsantihiin.

5. **Md. Saleeban Yuusuf Cali (Koore):-** marka hore waad salaaman tihiin, anigu dhowr kalmadood oo waaweynayn ayaan odhanayaa, horta saameynta sida dastuurku qorayo, in ciidan loogu yeedho dastuurkaa tilmaamay, wuuna waajibiyay wixii ciidan ah, waxaana run inay hadana ciidan yihiin oo ay u baahan yihiin tababar, darajo iyo aqoon iyo xirfad inay yeeshaan, waxaana laga maarmaan ah inay la jaanqaadaan qaab dhismeedka dalka, marka loo eego caalamka dawlado badan waxay isticmaalaan waxa la yidhaahdo securityga dibada iyo securityga Gudaha, oo ah laba qeybood oo kala madax banaan, halka waxaa lagu soo sheegay inay labada waajibaad ku leeyihiin.

   sidaa darteed waxa ila tahay had iyo jeer xeerarku waxay u baahan yihiin si aqoon ku dheehan tahay in diyaariyo, labada qeybood ee dibada iyo Gudaha oo waajibaadkoodii lawada xambaariyay ama loo wada dhiibey, waxaa ila tahay in qaab sidan ka duwan loo dhigo, oo ah in iyada laba qeybood oo two main department kala noqdaan, haduu doono madaxu ha ka dhexeeyee, sida caalamku u isticmaalo, MI5 iyo MI6 ama FBI iyo CIA oo midna Gudaha loo isticmaalo midna dibada, markaa hadaan laba lagakala dhigeyn, in laba waaxood oo waaweyn laga kala dhigo.

   Agaasimaha, waxaan qabaa sidii Md. Cartan soo jeediyay, Agaasime waa kalmad civil ah marka maamullka laga hadlayo, mar hadii laga hadlayo

ciidan waa in laga dhigaa, sidaa darteed waxaa ku haboon in la yidhaahdo Madax.

waxaan kaloo meeshaba sharciyan aan ka muuqan hay'adan madaama loo sameeyay inay si degdeg ah uga hortagto danbiyada, madaaama sidaa loo abuurey oo ay waajibaadkeeda ka mid tahay awood fulineed oo ay wax ku qaban karto meesha laguma qoran, sidoo kale haday negligence la yimadaan waxa ciqaabtoodu noqoneyso lama sheegin, halkaa waxaa ka muuqda loopholes weyn oo sharciga cidna u gargaareyn, hadii 2 saac ama 3 saac ka hor uu informaionkaa helo, hadii ku wargaliyo wargaliyo taliya ciidanka booliiska, hadii dil yimaado yaa ka masuula danbigaa, waxay ahayd in lagu soo qoro ama awood fulineed la siiyo, ama la siiyo cida fulin weydaa amarkaa waxa lagu ciqaabayo, taana waxaan filayaa in mudanayaal badan ka hali doonaan.

***Waxaan kaga baxayaa oo ugu muhiimsan:-***

- In awood fulineed oo ay wax kaga hortagi karaan ama wax ku qaban karaan waa in loo sameeyaa oo ay helaan, waana lagama maarmaan, waad mahadsan tihiin.

6. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** marka hore xeerkan ahmiyad buu leeyahay, lama odhan karo ahmiyad malaha lama odhan karo, haseyeeshee Xeerarkeenu waa inaaney dastuurka iyo xeerarka jira ka horiman, markaad eegto xeerkan dhaliisha u horeysaa waxa weeye markaan eegto gogol dhigiisa malaha saldhiga dastuuriya, waana xeer ka soo baxay Gole sharci-dejineed, wuxuu ka soo horjeedaa **Qodobka 128aad** ee dastuurka, wuxuuna kaga soo horjeedaa xeerkasta oo aan shareecada waafaqsanayn ama dastuurka waafaqsanayn waa waxba kama jiraan, sidaa darteed malaha xeerkani saldhiga dastuuriya oo uu ka duulayo.

   Sidoo kale xeerkani waxaad moodaa inuu si mug leh uga horimanayo qaybta xoriyaadka guud ama mabaadiida guud ee dastuurka sida ku xusan **Qodobka 25aad**, awalba wey jireen xeerar ka horimanayay, sida Xeerka Booliiska xoriyaadka qofka waxaad moodaa inay ka hor imanayso, wuxuu kaloo xeerani cabudhinayaa xeerka xuquuqal insaanka, sidoo kale wuxuu cubudhinayaa Xoriyada iyo Saxaafada, waxaas oo dhan marka loo eego waa in la helaa inuu waxaas dhan laga saaro waxyaabaha baban ee hoos u dhigaya xoriyaadka, oo Xeerkan gogol dhig cad loo sameeyaa, oo uu yeeshaa master uu ka duulayo.

***Sidaa darteed waxaan qabaa:-***

- Nuqulka Xeerkan in dib loogu noqdo, lana soo akhriyo Dastuurka iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee dalka sidii aanu uga horiman lahayn.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
---------------------------------------------